## Ma kula tanay in xuquuqdaada xaga guryaha lagu xad gudbay?

**Qor!!!**

Waxa ugu muhimsan ee ku caawin karaa waa adigoo qoraal faahfaahsan ka qora wixii dhacay! Waxaad qiyaastaa "waqtiga wax lagugu sameeyey" waxa kugu dhacay markaad is tidhi guri ijaaro ama aad gado meel aad ku noolaato.

**Hubi in aad ku dartid:**

- Soo koob wixii dhacay (Ayo, maxay, halkee, waqtigee);
- Magaca, cinwaanka, iyo taleefon namberka dadka arinta ku jira oo dhan;
- Xayeesiin kasta oo aad aragtey oo ku saabsan guryaha;
- Waraaq kasta oo lagu siiyey.

### LA XIDHIIDH THE FAIR HOUSING CENTER OF GREATER BOSTON!!

Xarunta waxay si toos ah kaala shaqeyn doontaa sidii xal loogu helilahaa arintan ama dacwadaada waxa loo gudbin doonaa xeer ilaaliye, Qaybta U.S. Dept. of Housing and Urban Development, ama Massachusetts Commission Against Discrimination. Xaruntani talaabo arintaada kama qaadi karto adiga oo aan fasaxin. Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaan (617) 399-0491. **Markaad soo hadashid, fadlan hay taleefonka intaanu kugu xidheyno turjubaan.**

## wuxuu hirgelinayaa dadka ku nool Boston oo dhami in ay usinaadaan guryaha

Essex, Middlesex, Norfolk, Plymouth, iyo Suffolk beelaxyada.

The Fair Housing Center *of* Greater Boston

59 Temple Place, #1105
Boston, MA 02111
Phone: (617) 399-0491
Fax: (617) 399-0492

TTY users, please call the MA Relay Service at 1-800-439-2370
E-mail: info@bostonfairhousing.org
www.bostonfairhousing.org

Somali national origin

# Xuquuqda aad ku leedahay Xaga guriyeenta:

## Halkaad U Dhalashada



Waxxaa diyaariyey Fair Housing Center of Greater Boston

*"Waxaan goosanay in aan guriga si aan rasmi aheyn suuqa uga saarno."*

*"Waxaa laga yaabaa in ay xaafad kale kuu fiicnaan laheyd ."*

*"Aqalka waxaan ku tusi karaa markaan arko greenkaadhkaaga."*

*"Miyaad tahay Mareykan?"*

*"Waxaan rabaa in aan arko wax cadeenaya deganaanshiyahaaga."*

*"Waa in uu qofkiin Ingriisi ku hadli karaa."*

**Tani ma kula tahay waxaad hore u maqashey?**

Haday sidaa tahay, xuquuqdaadii guriyenta ayaa lagu xad gudbey. Gobolka iyo dowladda sare qaanuunada u yaala ma ogola in la duudsiiyo xaqa dadka guryaha raadinaaya iyadoo lagu saleenaayo midabkooda ama cidey u dhasheen.

**WAA SHARCI DARO IN QOFKA GURIGA LEH AMA QOFKA KA SOCDA WAKAALADDA GURYAHA UU DIIDO INUU KAA IJAARO IYADOO AY U SABABTAHAY MIDABKAAGA, HALKAAD KU DHALATAY, ASALKAAGA, CAADADAADA AMA LUQADAADA.BARO SIDAAN U GARAN LAHAYD XAQDUUDSIGA. MIDABTAGOORKU BADANAA MA AHA WAX CAD. WAXAA LAGU MALDIHI KARAA GACAN QAAD IYO QOSOL.**

## Qodobo Kala Duwan iyo Shuruudo

Sharciga ayey ka soo horjeedaa in la weydiiyo debaaji dheeraad ah ama kirada lagu kordhiyo ama arjigooda dariiqo adag la marinaayo iyadoo lagu saleenaayo halkaad u dhalatay

## Xayeysiin

Sharciga ayey ka soo horjeedaa in joornaalka, qofka guriga leh ama wakaaladda guryaha ay daabacaan ama yidhaahdaan hadalo xaqduudsi ah

## Fiiris

Sharcigu ma ogala in bulshooyinka, dariska ama guryaha meelaha qaarkood ay si gaar ah u fiiriyaan hakay u dhasheen daraadeed

## Maxaa Kugu Kalifaaya Inaad Aad Ka Gilgilatid Xaqduudsiga Dhinaca Guryaha?

**Haddii aad cunsuriyeenta guryaha aad ka gilgilatid, waxaad heli kartaa:**

- Gurigaad rabtey;
- Waxaa laguu soo celin karaa kharashka sida lacagta guuritaanka kaaga baxdey ama lacagta kaaga baxdey guryaha kumeel gaadhka ah;
- Waxaa lacag laguu siin karaa niyad jab kastoo kugu dhacay xaqduudsiga daraadii;
- In la soo dejiyo amar reebaya xaqduudsiga imankara mus taqbal ka ama ku qasbaaya qofka guriga leh ama wakiilka inuu ka kireeyo dadka kale ee guryaha raadinaaya oo ka mid yihiin dadka dabaqada la ilaaliya ah.
- Habka aad u bixin lahayd xeerilaaliyahaaga (waxa jira xeerilaaliyaal qaata dacwada ayagoo ku tashanaya in ay lacag heli doonaan haddii aad dacwada ku guuleysatid oo keli ah);
- Kalsoonida aad ka helaysid ka gelgelishada xaqduudsiga iyadoo dadka kale aad dariiq u furttey si aaney umari dhibtii ku soo gaadhey.